## Sidee ayaan ku ogaan doonaa in cunuggayga laga difaacay?

Dhiigga cunuggaaga ayaa la baarayaa marka uu jiro 12 bilood si loo eego in si buuxda looga difaacay, oo uusan fayrusku ku dhicin.

**Qaadashada buuxda ee tallaalku waxay 90–95% si waxtar leh cunuggaaga uga difaacaysaa jirada caabuqa cagaarshowga B.**

## Tallaalka cagaarshowga B ma yahay mid badbaado ah?

Tallaalku aad ayuu badbaado u yahay waxaana la siiyay dhalaan malaayiin ah aduunka oo dhan iyada oo aanay jirin wax saamayn xun oo tallaalka ah.

## Aamin ma tahay inaan cunuggayga siiyo naaska?

Haa – laakiin waa in cunuggaagu uu wali helo tallaal buuxa. In kasta oo fayrusyo yar lagu arkay caanaha naaska hadana lama hayo warbixin sheegaysa in caanaha naaska laga qaado cudurka. Inaad si fiican u daryeesho ibta naasahaaga si aysan u dilaacin una dhiigin, ilmahana la tallaalo ayaa yaraynaysa khatarta in ilmaha dhasha ay khatarta cudurka galaan.

## Jirada Cagaarshowga B saamayn ma ku yeelanayaa uurkayga iyo dhalitaankayga?

Maya, xanuunka cagaarshowga B saamayn kuma yeelanayo uurkaaga ama sida aad u dhalayso cunugga.

**Haddii aad qabto wax su'aalo ama walaac ah, la hadal umulisadaada ama dhakhtarkaaga.**

## Sidee ayaan uga ilaalin karaa dadka kale ee qoyska cudurka cagaarshowga B?

Cudurka cagaarshowga B waxaa la isagu gudbiyaa wada noolaanshaha iyo isutagga (isu galmoodka). Haddii aadan horay u samayn, waxaan ku talinaynaa in qofka aad isqabtaan, dadka guriga ku nool oo ay ku jiraan caruurta, laga baaro cagaarshowga B, ka dibna la siiyo ka hortag tallaal si looga hortago.

### Xog Muhiim ah

Waqooyiga Ireland Cagaarshowga B iyo C Shabakadda Rugaha La Maareeyay (Northern Ireland Hepatitis B and C Managed Clinical Network)
www.hepbandcni.net

British Liver Trust
6 Dean Park Crescent,
Bournemouth BH1 1HL
Khadka-caawinta: 0800 652 7330
(10 subaxnimo ilaa 3 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha)
Waydiimaha guud: 01425 481320
Emayl: info@britishlivertrust.org.uk
Websaydh: www.britishlivertrust.org.uk


HSC Public Health Agency

hep B C Northern Ireland Hepatitis B & C Managed Clinical Network

Public Health Agency,
12–22 Linenhall Street,
Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (qiimaha caadiga ah).

www.publichealth.hscni.net

08/17



# Cagaarshowga B: ka ilaalinta cunuggaaga

*Hep B - Somali*

## Waa maxay cagaarshowga B?

Cagaarshowga B waa jiro (caabuq) uu keeno fayruska cagaarshowga B. Jiradu inta badan waxay saamaysaa beerka, laakiinse waxaa laga helaa dhiigga iyo dheecaamada jirka. Dad badan oo qaba cagaarshowga B wax calaamado ah ma arkaan, mana oga inay cudurka qabaan. Kuwa kale waxay leeyihiin astaamaha "durayga oo kale," oo maqaarkooda iyo indhahooda ayaana noqda midabka jaalaha (jaundice). Cudurka Cagaarshowga B waxaa keliya lagu aqoonsan karaa baadhitaanka dhiiga.

Dadka waaweyn ee qaba cagaarshowga B inta badan si buuxda ayay uga bogsoodaan, laakiin marmar ayuu fayrasku dhiigga ku sii jiraa. Haddii sidaan dhacdo, dadka ay saamaysay waxaa ku dhaca caabuq halis ah (nolosha oo dhan jiraya) ee cagaarshowga B, jiradana waxay ugudbin karaan dadka kale. Khatarta inuu cagaarshowgu noqdo mid raaga waxay ku xiran tahay da'da ay jiradu qofka ku dhacday. Khatartu waxay aad ugu yar tahay dadka waaweyn waxayna ku badan tahay dhalaanka ay hooyadood qabto cudurka cagaarshowga B ee raaga.

Cagaarshowga B waxaa laga helaa caalamka oo dhan. Fayruska waxaa inta badan hooyadu u gudbisaa cunuggeeda, caadi ahaan wakhtiga dhalmada. Waxaa lagu qiyaasaa in UK, 1 ka mid ah 350 kii qof ay qabaan cudurka cagaarshowga B daran. Dhamaan dumarka ku nool UK ee uurka leh waxaa la siiyaa baaritaanka dhiigga ee cagaarshowga B oo qayb ka ah daryeelkooda dhalmada ka hor. Cagaarshowga B waxuu qayb ka yahay barnaamijka tallaalka caruurta ee caadiga ah*. Doosas dheeraad ah ayaa la siiyaa dhalaanka ay dhashay hooyo qabta cagaarshowga B si looga hortago in cunuggu cudurka ka qaado hooyadiis wakhtiga dhalashada.



**Waxaa muhiim ah inaad ogaato inaan cunuggaaga aan si buuxda loo ilaalinayn ilaa ay qaataan talaalka oo dhamaystiran.**

*Waxii dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka talaalka ee caadiga ah, ka eeg warqadda PHA *Talaalka dhalaanka ilaa iyo hal sanno jirka www.publichealth.hscni.net/publications*

## Sababtee ayuu cudurka cagaarshowga B uu khatar ugu yahay dhalaanka?

Daawayn la'aanta sida in la talaalo, 9 ka mid ah 10 dhalaanka uu cudurku ku dhaco xiliga dhalashada waxay yeeshaan jirooyin waqti dheer jira. Dhalaankaani waxay halis ugu jiraan inuu ku dhaco cudurka beerka oo qatar ah marka ay waynaadaan waxayna xanuunka u gudbin karaan xubnaha kale ee qoyska, iyo dadka kale ee ay mustaqbalka la kulmaan.

**Tallaal la'aan, kuwo badan oo ka mid ah dhalaanka ay dhashay hooyo qabta cagaarshowga B waxaa ku dhici doona xanuunka.**

## Maxaa dhacaya haddii aan qabo cudurka Cagaarshowga B oo aan uur leeyahay?

Waqooyinga Ireland, dhamaan haweenka uurka leh ee qaba cudurka cagaarshowga B, waxaa loo diraa oo arka dhakhtarka beerka (hepatologist), waqtiga ay uurka leeyahiin. Waxaad balanta qaabilaadda beerka ka helaysaa Isbitaalka Royal Victoria ee ku yaal Belfast.

**Waa muhiim inaad tagto balantaada qaabilaadda beerka (liver clinic).**

Xataa haddii aad horay u tagtay rugta caafimaadka beerka, waa muhiim in sida ugu dhaqsaha badan laguu arko inta aad ku dhexjirto waqtiga uura.

Dhakhtarka beerku waxuu qaadayaa baaritaanno lagu eegayo caafimaadka beerka iyo heerka uu le'eg yahay fayruska (caabuqa) beerkaaga ku jira. Iyada oo ku xiran natiijada baaritaanka, waxaa macquul ah in lagu siiyo daawooyin lid ku ah fayruska si aad u qaadato waqtiga danbe ee uurkaaga. Daawooyinku waxay hoos u dhigayaan fayruska jirkaaga ku jira waxayna yaraynayaan fursadda aad u gudbin karto cunugga wakhtiga dhalmada. Dhakhtarka beerku waxuu kaala talinayaa inaad daawo qaadato wakhtiga aad uurka leedahay wuuna kaala hadlayaa arinkan.

## Goorma ayay tahay in cunuggayga la siiyo tallaalka cagaarshowga B?

Dhamaan dhalaanka waxaa hadda la siiyaa tallaalka cagaarshowga B, oo qayb ka ah barnaamijka talaalka ee ay helaan (saddex doos ee DTaP/IPV/Hib/HepB, oo loo yaqaan 6 ku jirta 1 tallaal).*Dhalaanka ay dhasho hooyo qabta cudurka cagaarshowga B waxaa la siinayaa taallaalo cagaarshowga B oo dheeraad ah, oo bilaabanaya markay dhashaan, si looga hortago inay hooyada ka qaadaan jirada muddada dhalashada.

Dhalaanka halista ugu jira inuu ku dhaco cagaarshowga B waxaa la siiyaa lix doos tlalaal wata cagaarshowga B.
- tallaalka cagaarshowga B ee wax yar dhalashada ka dib
- tallaalka cagaarshowga B ee 1 bil jirka
- 6 ku jirta 1 ee 2 bilood jirka
- 6 ku jirta 1 ee 3 bilood jirka
- 6 ku jirta 1 ee 4 bilood jirka
- tallaalka cagaarshowga B ee 12 bilood jirka

Xaaladaha qaarkood, cunugga waxaa macquul ah in la siiyo difaac-dhiigeedka cagaarshowga B (hepatitis B immunoglobulin antibodies) markay dhashaan ka dib. Waa lagaala talin doonaa haddii cunuggaagu u baahan yahay difaac-dhiigeed, hadduu u baahan yahayna, waxaa la siinayaa marka la siinayo taallaalka ugu horeeya.

**Waa in laguu sheego wakhtiga iyo goobta cunuggaagu ka helayo tallaalka inta aadan ka bixin isbitaalka, waana inaad iska hubiso inaad tan ogtahay.**